

Dib u soo noolaynta Elephant iyo Castle Tusmada Barnaamajka

Iyada oo ku leh qoto dheer taariikhda magacna ku leh London, waxaa Elephant iyo Castle loo qoondheeyay £1.5 bilyan oo looga beddelaayo wajiga ay haatan lee-dahay. Inta lagu jiro tobaneeyada sano ee soo socdaan waxaa loo beddelayaa Elephant xarun magaalada oo wayn ee magaalada London iyada oo loo samaynaayo 5,300 oo guryo cusub ah, shan meelood oo banana, dhismo yaab leh iyo kumaan-kun oo ah jogoyin shaqo ah oo ay lee-yahiin dadka deegaanka.

Sida ay manta tahay Elephant iyo Castle

Waxay dib u soo noolaynta Elephant iyo Castle qaadanaysaa qiyaastii toban sanadood si loo dhammaystiro. Laakin waxay mar horeba dadka ah reer London doonayaan inay noqoto wax wayn.

Majaajilada

Waxaa dib loo furay albaabada Coronet oo ku yaalo Kent Road oo ay ka heesen Blur iyo Justin Timberlake. Waxay Ministry of Sound soo jiidanayaa dadka naadi-yahanka ah ee koonfurta webiga, waxayna jaalliyadda Latin Amerik-na ka furtay Kooxda Saalsada wareegga koonfureed (southern roundabout).

Cuntada iyo Cabidda

Pizzeria Castello oo ku yaala qaybta kore ee Walworth Road waxay tahay maqaayadda ugu caansan ee Elephant iyo Castle. Waxaa soo raaco La Bodiguita, oo ah meel Laatiin ee laga qaxwaysto waxayna ku taalaa bartamaha halka laga dukaamaysto, iyo Tiendas del Sur, ah dukaamada Laatiinka iyo ganacsiga. Beehive-ta Penrose Street oo ah meel lagu cabo khamriga.

Dukaamaysiga

Walworth Road waa meel can ku ah waddada dukaamaysiga. Baldwin's, waa dukaan alaabta caafimaadka iibiya oo ka ganacsanaayay ilaa 1844. East Street Market waxuu sameeyey furitaanka amaahda barnaamijka telefishinka ee Only Fools and Horses waana dhulkii uu odaygii caanka ahaa Charlie Chaplin ku ciyaari jiray. Tlon, waa dukaanka lagu iibiyo buugaagga soo maray gacanta labaad waxuuna ku yaalaa dabaqa bartamaha dukaamaysiga waxuuna u dhow yahay guriga Pullens Yards oo laga heli karo tiro ah fanka iyo beecmushtarka farshaxanka.

Hiddaha

The London College of Communication waxay kuu biirinaysaa dareen faneed halkaa, waxay Imperial War Museum u jirtaa xooga yar jidka iyo Cuming museum waxay ku taalaa dusha sare ee Walworth Road waxaana lagu arki karaa oo buuxiyay waxyaabaha yaabka leh ee arkiloojiyada. Waxaa loo soo wareejinayaa aagga The Siobhan Davies Dance Company.

Dhismaha

Waxaa naqshadeeyay boloogga deegaaneed Metro Central Heights ee caanka ah Erno Goldfinger waxaana markii hore lo yaqiin Alexander Fleming House. Perronet House waxaa sameeyay Guddiga London horaantii 1970-dii. Halka xasuusta ee Michael Faraday waxay ku fadhidaa wareegga waqooyi (northern roundabout) waxaana dib loogu meelaynayaa meel kale mustaqbalka.

Isku xirka Elephant

Barnaamajka Miisaaniyadda Isku Xirka ee Dib u Soo noolaynta Elephant, oo haatan ku jiro heerkiisa ugu dambeeyo, waxaa loo soo bandhigay in lagu caawiyo u diyaarinta degganayaasha deegaanka ee loogu talagalay £1.5 bilyan ee dib loogu soo noolaynaayo mustaqbalka soo socdo Elephant iyo Castle.

Isku xirka Elephant waxay u soo bandhigtay aagga 43 barnaamajyo macquul ah ee dhaqaale, jismiyeed iyo bulsho.

Barnaamajka Isku xirka waxaa ku jiraan:

Elephant Impacts, barnaamajka lagu bixinaayo in lagu hagaajiyo jismi ahaan aagga Elephant iyo Castle ka hor barnaamajka dib u soo noolaynta. Waxaa mashruuca ku jiraan nadiifinta iyo iftiiminta waddooyinka la hoos maro, dib u rijiyeenta iyo dib u iftiiminta buundooyinka, xir-xiridda muuqaalka nalalka ee dhoowr dhismooyin, ifintiiminta geedaha, geedo abuuridda iyo astaamo u samaynta dugsiyada.

into, waa mashruuca wararka iyo isgaarsiinta teknoolojiga ay ku jiraan shabakadda internet-ka jaalliyadda, xarunta waxbarashada dowladda, shaldhigga warbaahinta jaalliyadda iyo xirfadaha iyo tabobaridda nolosha iyo xirfadaha. Booqo www.into.org.uk.

Elephant Angels, waa barnaamajka keliya ee siiyo jaalliyadda talosiinta waji-ka wajiga ah iyo hawsha looga soo qabanaayo dibedda. Waxaa lagu caawiyaa xubnaha jaalliyadda ee ku sugan 'halis' oo bulsho ahaan-na takooran si ay u helaan shaqo, guryo iyo kaalmada waxbarashada.

The Elephant and Castle community warden scheme (Nidaamka ilaalinta Jaalliyadda Elephant iyo Castle), waxay ka yaraysay cabsida dembiyada degganayaasha dhexdooda, shaqaalaha iyo dadka soo booqanaayo aagga.

Business Extra, waxuu u adeegayaa ganacsiga yar-yar ee Elephant iyo Castle iyo Southwark iyada oo lagu caawinaayo inay la qabsadaan isbeddelka jawiga ganacsiga oo ay abuurtay dib u soo noolaynta.

Kick Start, waxay ku hawlan tahay caruurta ku sugan halis ee dhammaan jinsiyadaha ee waxqabta iyo barnaamajyada kaalmaynta. Waxuu barnaamajka haystaa 550 ka badan oo caruur ah ee ka qaybqaato waxqabadka kubadda cagta, fanka iyo warbaahinta waxay u sii ballaranaysaa in lagu soo daro wada-tashiga dhallinyarda iyo in la bilaabo ka qaybqaadashada. Waxqabadyada waxaa ku jiraan kubadda cagta iyo, fanka iyo warbaahinta

Sidee u ekaan doonaan Elephant iyo Castle?

Waxay Elephant iyo Castle samayn doonaan mustaqbalka isku-dhafyo ah guryo, dukaamo, meelo waxqabad ahaan lagu raaxaysto, isku xirka gaadiidka, xafiisyo la dego iyo meelo banana.

Waxaa qorshayaasha lagu soo jeedinayaa aagagga dabci ahaan ugu waawayn.

Barxadda madaniga

Halka manta ku yaal wareegga waqooyiga (northern roundabout) waxaa laga abuurayaa barxad madani cusub oo indhaha qabanyo laga soo bilaabo 2010 ilaa 2014. Waxaa loo isticmaalayaa meesha lagu kala beddesho gaadiidka dadwaynaha waxayna noqonaysaa meel lagu qabto damaashaadyada, bandhigyada iyo meel waxyaabo laga daawado.

Waddada Walworth

Waxaa loo dheeraynayaa inuu ku darsamo barxadda madaniga iyo in laga abuurro inta badan dukaaman cusub waddada dheer oo ay ka muuqanayaan dukaaman iyo meelo laga qaxwaysto.

Jidka tareenka

Dhulka sare ee ah saldhigga tareenka ee haatan jiro waxaa laga dhigayaa saldhig cusub ee ku daabolan miraayado ee leh muqaalka bartamaha London. Udubyada jidka waxaa loo furayaa inay yeeshaan meel ganacsi iyo shirkado iyo inay u furnaato inta u dhexayso barxadda madaniga (civic square) iyo beerta magaalada.

Barxad suuqeed u furan hawada

Waxay barxadda suuqa u ekaanaysaa tusmo ahaan Covent Garden ama Suuqa Degmada (Borough Market). Waxay ku fadhidaa bariga udubyada waxayna ka hor imaanaysaa jawiga Walworth Road (Waddada Walworth).

Beerta magaalada (Town park)

Waxaa laga abuurayaa Deegaanka Heygate beer magaalada cusub kuna heeraraan guryo leh balkoonayaal.

Waddada Heygate (heygate Street)

Dib ayaa loo habeenayaa Waddada heygate si si daran loogu ballaariyo 40-mitir, waxaa la sameyn doona jid wayn ee loogu talagalay gawaarida, basaska, baskiilada iyo Traamka cusub ee Cross River oo leh geedo isku safan. Waxaa ku ooli doonaan lix ilaa siddeed dhismooyin dhabaqyo ah ee lagu safaayo jidka, waxuuna yeelanayaa dukaaman, meelo laga qaxwaysto, xafiisyo, maktabad iyo guriyeen cusub.

Waqtiga dib u soo noolaynta

Waxay labadii sanadood ee ugu dambeeyay Guddiga Southwark sii fiicnaynayaan qorshayaashooda dib u soo noolaynta ee Elephant iyo Castle. Barnaamajkaan han-waynka ah waa inuu ku dhammaadaa 2014.

Maarso 2002	Qorshayaashii dib u soo noolaynta ee hore way dhaceen ka dib markii Guddiga Southwark iyo lamaanahooda dhisidda loo doortay, oo ahaa Southwark Land Regeneration, oo ay ku guul daraysteen inay gaaraan heshiis.
Maajo 2002	Guddiiga Fulinta ee Guddiga Southwark waxay cusboonaysay ballanqaadkoodii ahaa in dib loo soo nooleeyo Elephant iyo Castle.
Janaanyo 2003	Waxuu Guddiga Southwark soo daabacay Emerging Framework Principles ee mustaqbalka dib u soo noolaynta Elephant iyo Castle.
Juunyo 2003	Waxaa la daabacay qoraal aan rasmi ahayn ee horumarinta ee loogu talagalay wadatashiga guud.
Febaraayo 2004	Waxaa loo qaatay dhismaha Horumarinta in lagu biiriyo tasmada qorshaynta oo ay sameeyeen Guddiga Southwark ka dib markii lagu guulaystay gacansiinta 80% ee jaalliyadda deegaanka
Juunyo 2004	MAKE Architects waxaa loo magacaabay inay sii ficneyaan shaqo isku xirka, oo diyaar u ah in loo sii daayo qaybta ganacsiga.
Oktoobar 2004	Waxaa bilaawday habsocodsiinta lagu raadinaayo in lagu helo lamaanayaal.
Febaraayo 2005	Waa bilowga habsocodsiinta rasmiga ah ee Yurub ee lagu raadinaayo lamaanaha wayn ee ganacsi.
2006	Xulashada lamaanaha horumarinta dhisidda ee la rajaynaayo.
Barka dambe 2006	Bilowga dhisidda meelaha laga dhisaayo guryaha.
2005-2010	Horumarinta qaybta koonfureed ee aagga dib u soo noolaynta ay ku jiraan ballaarinta Walworth Road, Heygate Boulevard iyo St Mary Churchyard.
2006-2011	Burburinta heereedka Deegaanka Heygate iyo dib ugu meelaynta kireestayaasha guryaha cusub ee gudaha iyo hareeraha Elephant iyo Castle.
2010	Burburinta bartamaha dukaamada Elephant iyo Castle.
2010-2014	Dhisidda barxadda madaniga (civic square) iyo bilowga Horuminta dhismaha Degmada Heygate.
2014:	Waxaa la dhammaystirayaa dib u soo noolaynta Elephant iyo Castle.